

# RCMP-GRC



ROYAL CANADIAN MOUNTED POLICE • GENDARMERIE ROYALE DU CANADA



## RCMP gudaha Kanada: Hagaha Qofka Dhawaan yimid









## Jadwalka Tasmadda

Hordhaca .....	6
Ku saabsan RCMP/ Doorka Booliska .....	6
La xidhiidh Booliska .....	7
<b>Soo wac 911 – Gurmadka .....</b>	<b>7</b>
Wicitaanada Shilka ah 911 .....	7
Tusaalooyinka wicitaanka aan gurmadka ahayn:.....	8
Waxa loo baahan yahay marka aad soo wacdo booliska? .....	8
Ka warbixinta dembi magaca oo qarsoon .....	9
Jeedinta Warbixinta Onlaynka ah.....	9
Is dhexgalka lala sameeyo Booliska.....	9
Xaga Gurigaaga.....	10
Marka la wado Baabuurka.....	10
Haddii Lagu Qabto ama uu Ku xidho Boolisku.....	11
Su'aalaha, Walaacayda iyo Cabashooyinka.....	12
Adeegyada Dhibanaha .....	12
Diiwaanka Dembiga iyo Hubinta Qaybta Nugul .....	12
Fursadaha Mihnada.....	13
Fursadaha Mutadawaca .....	13
Barnaamijka Booliska Mutadawaca ah .....	14
Barnaamijka Cadaalada ee Hagaajinta .....	14
Xad gudubka Guriga .....	14
Dembiga Nacaybka.....	14
Caafimaadka Maskaxda iyo Jugta naxdinta leh.....	15
Dadka La waayay .....	15

Badbaawada Waayeelka .....	15
Ku xad gudubka qof Waayeel ah .....	16
Ka hortagga Dembiga .....	16
Badbaadada Gaarka ah.....	16
Budhcad nimo.....	16
Dembiga Baabuurka .....	17
Amniga Guriga .....	17
Badbaadada Jidka.....	17
Khiyaamooyinka iyo Qaababka khiyaamada.....	18
Ku ilaali Badbaado Carruurta.....	18
U xoog sheegashada.....	19
Badbaadada Internatka .....	19
Kooxo fal dambiyeed.....	19
Maandooriyaha .....	20
Ilaha Dheeraadka ah.....	21







## Hordhaca

Hagahan waxaa loogu talo galay in la bixiyo macluumaadka ku saabsan:

- doorka ilaalinta gudaha Kanada;
- goorta iyo sida loola xidhiidho booliska;
- waxa la filayo haddii ay kuu soo dhawaadaan ama ay booliso wax ku waydiiyo;
- barnaamijyada ka hortagga dembiga; iyo
- sideed u ciyaari kartaa doorka ka hortagga ah ee ka hortagga dembiga xaafadaada.

## Ku saabsan RCMP/ Doorka Booliska

RCMP waa adeega booliska qaranka ee Kanada. RCMP waxay ku ballan qaadaysaa xasaasiyada dhaqanka, iyo macaamilka aan eexda lahayn ee tixgelinta leh dhammaan dadka. RCMP ayaa ka masuul ah:

- ka hortagga iyo baadhitaanka dembiga;
- ilaalinta nabbada iyo nidaamka;
- dhaqan gelinta sharciyada; iyo
- ka qayb qaadashada amniga qaranka;

Gaar ahaan, RCMP waxay ka caawin kartaa xaaladaha sida:

- Baadhitaanka guri jabsashada;
- Ka caawinta badbaadada jidka hadidi ay jiraan isku dhaca baabuurta;
- Helida qof lumay;
- Siinta macluumaadka ka hortagga dembiga si looga hortaggo dembiyo dheeraad ah; iyo
- Ka qayb galka xafladaha bulshadda iyo qabashada xakamaynta baabuurta jidka dhacdooyinka gaarka ah.

## Dirayska

Saraakiisha booliska waxay ka shaqeeyaan doorar kala duwan sida waajibka roondaynta guud ah, adeegyada jidadka iyo adeegyada baadhitaanka la gaaryeelay. Waxaa loo lebisii karaa qaabab kala duwan, sida:

- **Dirayska Caadiga ah** – uu xidhaan saraakiisha waajibaadka guud, adeegyada jidadka, iyo saraakiisha ilaalinta bulshadda.
- **Marada Cad ama Buluuga ah** – muhiim ahaan la xidho dhacdooyinka gaarka ah ama ujeedooyinka xafladeed. Marad cad ee aykoonka ah waa dirayska laga aqoonsan yahay adduunka oo dhan inay tahay calaamada Kanada.
- **Dharka aan Dirayska ahayn** – kooxaha la gaaryeelay waxaa loo lebisii karaa dharka ganacsiga ama dhar iska caadi ah iyaddoo ku xidhan doorarka.



Haddii aanad hubin hadidi qof uu yahay sarkaal boolis ah, waxaad waydiin kartaa inaad aragto kaadhkooda aqoonsiga booliska ama calaamada. Sidoo kale waxaad wici kartaa xafiiskaaga booliska maxaliga si loo xaqiijiyo macluumaadka.

## La xidhiidh Booliska

Waxaan kugu dhiirigelinayaa inaad la xidhiidho adeegaaga booliska maxaliga si **looga warbixiyo dhammaan dembiga iyo hawsha shakiga leh**. Ka warbixinta falka dembiyeed waxay naga caawin kartaa aqoonsashada iyo qabataa shakiga, raad raacida meelaha dembiga, iyo in la garto sida loo isticmaalo ilahayaga.

### Soo wac 911 – Gurmada

Booliska, gurmadyada dabka ama caafimaadka soo wac 911 isla markaaba (24 saacadood maalintii, 7 maalmood todobaadkii).

#### Tusaalooyinka marka la wacayo 911:

- Gurmada waxaa ku jira dabka, dembiga socda, ama caafimaadka ama shilka nololaha khatar gelinaya ee u abaahan baabuurka ambalaaska.
- Wakhtiyada qaarkood nololaha khatar ayay ku jirtaa ama waxaa jira khatar dhow oo qofka ama dhismaha ah.
- Dhacida dembiga, sida jebinta iyo gelida.
- Marka dembiyada khatarta ah ay dhacayaan oo qofka laga shakisan yahay weli dhow yahay iyo/ama uu joogo goobta.
- Marka ay jirto fursada wanaagsan ee xidhida qofka laga shakisan yahay ama ka hortagga dembiga khatarta ah.

Markaad soo waco 911, shaqaalaha telefoonka qabanaya waxa uu ku waydiin doonaa haddii aad doonayso booliska, dabka ama ambalaaska iyo magaaladee. Haddii aanad awoodin inaad ku hadasho Ingiriisiga, shaqaalaha telefoonka ha ogaado ka uu yahay luqadda aad doorbidayso oo waxay samayn doonaan karaankooda si ay u helaan qof ku hadla luqadda la midka ah. Tusaale ahaan, waxay odhan kartaa "police, Sirrey, Somali."

Haddii aanad awoodin inaad kala xidhiidho sabab kasta, shaqaalaha qabanaya telefoonka si degdeg ah ayaa u soo diraya sarkaal booliska cinwaanka lambarka telefoonka lagaga soo hadlay.

#### Wicitaanada Shilka ah 911

Kumanyaal wicitaanada shilka 911 ayaa lagu helaa sanad kasta. Si nalooga caawyo in aan ka hortagno qayb wicitaanadan ah:

- Laakiin hore ha ugu bilaabin 911 gurigaaga ama telefoonada gacanta.
- Hubso in telefoonkaaga gacanta uu xidhan yahay si aad uga hortagto wicitaanka jeebka iska garaaco.
- U sharax carruurta sida iyo goorta la wacayo 911. Aan gurmada ahayn.



**Haddii aad garaacdo 911 si aan lagu talo gelin, ku jir khadka oo la hadal shaqaalaha qabta telefoonka. Hadidi kale waxaad ubaahan doontaa inaad dib u wacdo ama u jawaabto qof ahaan. Ahmiyadayadu waa in la xaqiijiyo inaad badbaado tahay. Dhib ma geli doontid ama ma helaysid tigidh soo garaacda khaladka ah, laakiin waxaanu ku waydiinaynaa inaanad weligaa dhigin, had iyo jeer ku jir khadka oo sharax waxa dhacay.**

Soo wac laynka aan gurmada ahayn marka aad u baahan tahay inaad ka warbixiso dembiga aan ahayn gurmada. Booqo websaydka RCMP si aad u hesho lambarkaaga RCMP maxaliga ah ee aan gurmada ahayn: <http://www.rcmp-grc.gc.ca/detach/en> (Ingiriisi iyo Faransiis)

#### Tusaalooyinka wicitaanka aan gurmada ahayn:

- Hadda ka hor waa laga warbixiyay dembiga oo ma jiraan dad laga shakisan yahay (waxa loola jeedaa baabuurkaaga waxaa la jabsaday xalay).
- Ka warbixinta dhaqanka laga shakisan yahay ama dhibta leh (waxa loola jeedaa xaflad buuq leh).
- Helida ama siinta macluumaadka la socodka ah ee faylka booliska hadda ka hor aad hayso.

#### **EEG IYADA. KA WARBIXI.**

*Hadidi shay u eekaado inaanu caad ahayn ama uu meesha ka maqan yahay, raac dareenkaaga oo uga warbixi booliska. Hawsha laga shakisan yahay*

- *qof aad u eegaya baabuurta iyo*
- *qof aan la aqoon oo u eeg inuu bilaa ujeed yahay*

#### **Waxa loo baahan yahay marka aad soo wacdo booliska?**


Shaqaalaha is haadhiisnta si wayn ayaa loo tababaray inay kaa soo ururiyaan macluumaad gaar ah adiga dhexda su'aalo taxane ah. Ku jirida khadka, is dejinta, iyo ka jawaabida su'aalaha, waxaad naga caawin kartaa hagida jawaabta. Marka aad ka jawaabayso su'aalaha, shaqaalaha is gaadhiisnta ayaa u gudbinaya macluumaadka sarkaalka booliska ee ku sii jeeda goobtaada.

#### **Qaar ka mid ah su'aalaha shaqaalaha is gaadhiisnta waxay ku waydiin doonaa waxa aad tahay:**

- **WAA MAXAY** shilka laga warbixinayo?
- **GOORMA** ayay dhacday?
- **HALKEE** ayay ka dhacday?
- **KUMAA** ku lug leh?
- **SABABTEE** ayaad ugu malaynaysaa inay tani dhacday?

*Shaqaalaha telefoonka qabta sidoo kale waxa uu ku waydiin doonaa haddii ay jiraan wax khamro ah, maandooriye ama hub yaala goobta markaas waxay ku siin karaan macluumaadka saraakiisha hawsha qabanaya.*

Haddii aad qayb ka tahay shilka booliska qof laga





shakisan yahay adoo ah, markhaati ama dhibane, sarkaalku waxa uu ku waydiin doonaa:

- Magacaaga oo buuxa
- Taariikhda Dhalashada
- Cinwaanka iyo lambarka telefoonka

Macluumaadkan waxaa la gelin doonaa kaydka xogta booliska amniga ah. Macluumaadka lama siin doono qof kale ama loomaisticmaali doono ujeedo kasta oo kale.

### **Ka warbixinta dembi magaca oo qarsoon**

- Haddii aad jeceshahay inaad uga warbixiso dembiga magaca oo la qarinayo waxaad la xidhiidhi kartaa Joojiyayaasha Dembiga lambarka 1-800-222-TIPS
- Joojiyayaasha Dembigu waxay qaadaan macluumaadka ka badan 115 luqaddood.
- Waxaad uga warbixin kartaa dembiga addoo booqanaya adeeg booliska gudaha bulshaddaada.
- Waxaad fariin qoraal ah u diri kartaa 9-1-1 haddii aad tahay dhegoole hore loo sii diiwaan geliyay, maqalku kugu adag yahay ama qof hadalkiisu liito.

### **Jeedinta Warbixinta Onlaynka ah**

Noocyada gaarka ah ee dembiga waxaa hadda lagaga warbixin karaa onlayn. Eeg boggaaga internetka adeega maxaliga ah ee booliska

Haddii ka warbixinta onlaynka ee jira aagaaga, qaybaha ee ka warbixinta ay ku jiraan:

- Alaabta la xado ee la helay oo ka yar \$5,000 (ma jiro qof laga shakisan yahay).
- Burburinta laabta ama jabsashada baabuurka ka yar \$5,000 (ma jiro qof laga shakisan yahay).
- Ku dhufasho iyo ka dhaqaaqa wata waxyeelo ka yar \$5,000 (aanu jirin qof laga shakisan yahay).
- Xad gudubka jidka ah sida wadista khatarta badan.

### **Is dhexgalka lala sameeyo Booliska**

Waxaa jira tiro sababo ah oo boolisku ugu baahanaan karaan inay adiga kula hadlaan miduun gurigaaga ama markaad ku maqan tahay gudaha bulshadda. Tusaale ahaan, boolisku waxay doonaan inay:

- Ka hadlaan wax ku saabsan baadhitaanka socda.
- Baadhaan xaafadaada macluumaadka ku saabsan dembiga dhacay.
- Bixiyaan ka hortagga dembiga ama macluumaadka badbaadada.

Waxaad caadi ahaan ku aqoonsan kartaa saraakiisha booliska diayskooda. Wakhtiyada qaarkood, waxaad la kulmi kartaa saraakiisha aan xidhnayn dirayska. Hadd aad ka qabto shaki ku saabsan aqoonsiga sarkaalka booliska, waxaad waydiin kartaa aqoonsigooda rasmiga ah, ay ku jiraan macaga sarkaalka iyo lambarka calaamada.



## Xaga Gurigaaga

Haddii boolisku soo xaadiro hoygaaga marka aad guriga joogto, waa inaad ka jawaabto albaabka. Haddii aad leedahay caado dhaqameed oo aad doonayso sarkaalka inuu ku ogsoonaado, fadlan iyaga ogaysii. **Fadlan sheeg in sarkaalka booliska shaqada ku jiraa aanu awoodi doonin inuu iska saaro kabaha marka ay soo galaan guriga.**

Haka baqan inaad su'aalo waydiiso haddii aanad fahansanayn shay. Haddii aanad ku hadal Ingiriisiga, waxaad waydiin kartaa xubin qoyska ah, saaxiib ama xataa jaarku inuu ku caawiyo. Haddii aanu qofna joogin, sarkaalku waxa uu samayn doonaa karaankiisa inuu helo qof si uu kaaga caawiyo luqadda la doorbidayo.

### WAA MAXAY...

#### **Dhibane**

Qofka dareen ahaan la waxyeeleeyay ama jidha haan iyaddoo natiijadu tahay dembiga, shilka ama dhacdada.

#### **Markhaati**

Qofka arka dembiga ama shilku oo dhacaya.

#### **Qofka la tuhunsan yahay**

Qof loo malaynayo inuu galay dembi.

#### **Saraakiisha boolisku waxay soo geli karaan gurigaaga marka:**

- Uu ku marti qaaday gudaha qof jooga gurigu.
- Ay hayaan asbaabo macquul ah si loo rumaysto inuu jiro gurmada ama qof waxyeelo soo gaadhay.
- Ay haystaan dhokumentiyada sharciga ah ee muujinay in gudaha loo oggol yahay.
- Si loo hubiyo fayo qabka qof gudaha hoyga (waxaa loola yeedha wicitaanka laga tegay 911)

## Marka la wado Baabuurka

Boolisku waxay leeyihiin masuuliyada ay ku joojiyaan baabuurka wakhti kasta si ay u hubiyaan xad gudubiyada wadista ama xad gudubyo kale. Sarkaalka booliska waxa uu sheegi doonaa in lagugu joojinayo iyaddoo nal lagu ridayo dhanka wadada ama baabuurkooda booliska dhexda ishaarada gacanta ah ama isticmaalka nalka, codka baabuurka booliska ama sameecado.

#### **Si loo xaqiijiyo qof kasta badbaadiisa marka uu boolisku joojiyo, waa inaad:**

- Aayar wadaa oo dhigtaa baabuurka dhanka midig ee jidka sida ugu dhakhsaha badan maadaama ay badbaado tahay in sidaas la sameeyo.
- Ku jirtaa baabuurkaaga iyaddoo
- si kale sarkaalka boolisku ku faro mooyaane.
- Hoos u dejisaa daaqada oo gacmaha ha la arko.
- La hadashaa sarkaalka oo bixi dhokumentiyada kasta oo la codsaday sida ruqsada wadista iyo warqaddaha diiwaan gelinta. Waa sharci in la tuso dhokumentiyadan sarkaalka booliska marka la samaynayo sidan.



Dembiyada jidka waxay ku dhacaan labba qaybood oo muhiim ah:

**Xad gudubyada Dhaqaaqa:** Xawaartaynta, ku guul daraysashada in la joojiyo nalka cas ee jidka ama calaamada joogsiga, beddelka haadka aan saxda ahayn, ama u raacida aadka ugu dhow baabuur kale.

**Xad gudubka Aan dhaqaaq ahayn:** Ku guul daraysiga xidhashada suumanka kursiga, nalka biriiga oo jabay, ama ku guul daraysiga in la soo saaro ruqsada wadista ee baabuurka, diiwaan gelinta baabuurka, ama caddaynta caymiska baabuurka.

Sababaha kale ee in la joojiyo marka la wado waxaa ku jira:

- Wadista liidata (waxa loola jeedaa, wadista la cabsan yahay)
- Wadista khatarta ah ama aan waxba la danaynayn
- Isticmaalka qalabka moobilka marka la wado baabuurka (waxa loola jeedaa fariimo qoraal ah dirida)
- Baadhitaanada fal dembiyeedka. Tusaale, adiga, rakaabkaaga iyo/ama baabuurkaaga waxaad ku hagaajin kartaa faahfaahinta qofka sarkaalku raadinayo
- Walaacyada badbaada

Sababo badan awgood, joojinta gaadiidku waa qaybta ugu khatarta badan shaqada booliska. Saraakiil badan ayaa ku dhaawacmay ama lagu dilay iyagoo ku jira habka caadiga ah ee joojinta baabuurta oo ka badan shaqo kasta oo kale. Saraakiishu waa inay turjumaan tallaabooyinka iyo dhaqamada dadka ku jira baabuurka, siba si joogta ah ula socdaan baabuurka kale ee jidka. Saraakiisha waxaa loo tababaray si loo sameeyo joogsiyada baabuurka ee badbaadadaah iyaddoo la raacayo nidaamyada qaar. Waxaad ka walaacsanaan kartaa wax ku saabsan qaabka ay ugu soo dhawaadaan baabuurkaaga, laakiin looguma talo gelin in lagu baqdin geliyo.



### Haddii Lagu Qabto ama uu Ku xidho Boolisku

Si waafaqsan Xuquuqaha Dastuurka Kanadiyaanka iyo Xoriyaha waxaad xaq u leedahay haddii lagu xidho ama ay ku xidhaan boolisku. Xuquuqdan waxaa ku jira:

In lagu sheego sababta lagu xidhayo ama lagu haynayo.

Inagugu wargeliyo oo lagu siiyo xaq inaad qareen lahaato daahid la'aan (oo macnaheed yahay marka xaaladu ay ku jirto xakamaynta iyo badbaadada dhammaan kooxaha la sugo.)

In loo oggolaado telefoonka qareen kasta oo aad rabto ama inaad ka hesho talo bilaash ah qareenka kaalmada sharciga.

Dhalin yarada ka yar 18 jirka waxay ku leeyihiin xuquuq dheeraad ah hoosta Xeerka Dembiilaha Dhalinta yar, kaas oo leh xaq uu kula hadlo waalidka ama masuulka.

Sarkaalka boolisku waxa uu xaq u leeyahay inuu ku xidho haddii ay rumaysan yihiin inaad tahay qof ku xidhan dembiga dhacay. Caadi ahaan, waxay isticmaali doonaan wakhtigan si ay u dheereeyaan xaalada



baadhitaanka oo ay u waydiiyaan su'aalo. Marka lagu xidhay dembiga, sarkaalka boolisku waa uu ku baadhi karaa adiga, shay kasta oo aad sidato iyo baabuurkaaga haddii jidh ahaan uu kuu dhow yahay wakhtiga xidhida.

Waxay sameeyaan raadintan si ay u xaqiijiyaan badbaadada qof kasta, si loo helo caddayn, oo looga ilaaliyo caddaynta inay burburto.

### **Su'aalaha, Walaacayda iyo Cabashooyinka**

Haddii aad qabto su'aalo, walaacyo ama cabashooyin ku saabsan is dhexgalka booliska waxaad leedahay xaqa aad kaga hadasho. Waxaad la xidhiidhi kartaa qaybtaada maxaliga ah ee RCMP wakhti kasta si aad ugala hadasho walaacyadaada.

Haddii aanad doonay inaad la xidhiidho qaybtaada RCMP si toos ah laakiin weli qabo walaacyo ku saabsan is dhexgalka booliska, waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa Qiimaynta Madaniga iyo Guddida Cabashooyinka ee RCMP (CRCC):

- Meel kasta oo Kanada ah: 1-800-665-6878  
TTY: 1-866-432-5837 (Dadka maqalku ku adag yahay)
- Dib u eegida Madaniga ah iyo Guddida Cabashada ee RCMP  
P.O. Box 1722, Station B  
Ottawa, ON K1P 0B3
- Websaydka: <https://www.crcc-ccetp.gc.ca/> (English and French)

### **Adeegyada Dhibanaha**

Adeegyada dhibanaha, loo bixiyay qaab wakhti habboon, door muhiim ah ka ciyaara yaraynta saamaynta waxyeelada leh ee waxyeelo u gaysashada ama dib u waxyeelaynta.

Ujeedada RCMO Barnaamijka Adeegyada Dhibahahu waa in la:

- Yareeyo saamaynta falka dambiyeed iyo dhibaataada dhibanayaasha iyo qoysaskooda iyo in la caawiyo iyaha wakhtiga soo kabashadooda;
- Sare loo qaado badbaadada iyo la caawiyo yaraynta khatarta waxyeelaynta dheeraadka ah;
- Kordhiyo ka qayb galka heerka dhibanayaasha gudaha nidaamka cadaalada fal dambiyeedka;
- Diyaariyo dhibanayaasha metelaya markhaatiyayaasha ee dacwadahaaga maxkamadda.

Wicitaanka caawimada, baadhitaanka falka dembiga, si loo bixiyo gudbinta, shaqada booliska ee iskaashiga dhow ee ururada adeegyada dhibanaha si loo xaqiijiyo dhibanayaasha falka dembiga si loo helo taageerada ay u baahan yihiin daahid la'aan.



### **Diiwaanka Dembiga iyo Hubinta Qaybta Nugul**

Waxaad u baahan kartaa hubinta diiwaanka dembiga wixii ah ujeedooyin badan, ay ku jiraan: shaqada, korsashada, safarka caalamiga ah, shaqada mutadawaca, muwaanimada, beddelka magaca, beddelka ardayga ama helida diiwaanka joojinta (hore u ahaa cafis). Marka la codsanayo hubka diiwaanka dembiga, la xidhiidh marka koowaad adeegaaga booliska maxaliga.

Faylka diiwaanka dembiga ee eedaymaha dembiga ee gaarka ah, dembi ku xukunka iyo kala noqosahda eeda, siiba macluumaadka sawirka faraha laga qaado. Waxaa ku jira sawirka laga qaado faraha haddii shakhsiga dacwad lagu soo eegay ama dembi lagu qaaday.

**Hubinta Diiwaanka Dembiga:** Nidaamkan waxa uu xaqiijiyaa haddii shakhsi uu leeyahay diiwaanka dembiga oo siiyo codsadhaha macluumaadka faahfaahsan oo si sharci ah loo shaacin karo.

**Hubinta Qaybta Nugul (VS):** Nidaamkan waxa uu xaqiijiyaa hadidi shakhsigu uu leeyahay diiwaanka dembiga, siiba hakinta kasta ee diiwaanka (hore loogu yaqaanay cafis) ee dembiyada galmada iyo diiwaanada booliska ee maxaliga ah ee macluumaadka la xidhiidha baadhida VS. Macluumaadkan waxaa si sharci ah loogu shaacin karaa codsadhaha.

**Fiiro:** Haddii aadu baahan tahay adeegyada sawirka faraha wixii ah ujeedooyinka socdaalka fadlan soo qaado warqad ama foomka ka soo baxay Waaxda Laanta socdaalka oo ay ku yaalaan shuruudaha, oo ay la socdaan caddayna.

### Fursadaha Mihnada

Ma jiro ciidan kale oo boolis ah gudaha Kanada ee bixiya heerarka adeegyada iyo kala duwanaanshaha ay bixiso RCMP. In ka badan 150 takhasus oo mihnadaha ah ee RCMP waxaa ka buuxa fursadaha waxbarashadda la sii wato iyo koboca.

RCMP waxay bixisaa mihnada shaqada aan mid kale la mid ahayn. Haddii aad rabto inaad faraq samayso gudaha bulshaddaada iyo wadankaaga, sahama waxa aanu bixinayno oo sahama mihnada shaqo aan sinabaugu dhawayn mida caadiga ah!

Si loo adeegsado RCMOO waa inaad buuxiso liiska shuruudaha oo aad u diyaar ahaato inaad 6 bilood ku qaadato xaga RCMP Academy gudaha Regina, Saskatchewan Liiska buuxa ee shuruudaha iyo dhacdooyinka shaqaalaynta soo socota, fadlan booqo: [www.rcmp-grc.gc.ca](http://www.rcmp-grc.gc.ca) (Ingiriisi iyo Faransiis).

### Fursadaha Mutadawaca

Mutadawiciinta waa qayb muhiim ah gudaha gudbinta guusha leh ee adeegyada ilaalinta bulshadda, oo gaar ahaan waxay muhiim u yihiin heerka qaybta halka shaqadoodu inta badan ay ku jirto gacmaha xubnahayaga, shaqaalaha, iyo macaamiisha bulshadda.

Ujeedada barnaamijyada mutadawaca waa in la raaciyo oo aan la beddelin shaqaalah. Mutadawiciinta ma samayn karaa sharci fulinta ama waajibaadyada hawl galeed ee ay sameeyaan Xubnaha Caadiga ah.



Mutadawiciintu waxay caawiyaan ugu dhawaan qayb kasta oo ilaalinta bulshadda ah. Waa tan dhowr tusaalooyin ah:

- Block Watch (Barnaamijka Ka hortagga Dembiga)
- Operation Red Nose (Mutadawiciin Baabuur wada raacda)
- Ku tabarka Baaskiil Qaabka jidka Carruurta/Roondada
- Ilaalada Garoobka diyaarada /Xeebta
- Kooxda Beebka Muusiga iyo Durbaanada
- Barnaamijka Adeegyada Dhibanaha

- Guddida La talinta Bulshadda
- Muwaadiniinta Roondaynaya
- Xafiiska Sarkaalka Bulshadda

Mutadawiciinta leh RCMP waa inay buuxiyaan dhowr shuruudood oo ay ku jiraan ahaanshaha ugu yaraan 16 sanadood jir, ahaadaa masuul iyo dabecad wanaagsan, iyo ka guul gaadhida heerka habboon ee in amni ahaan waxba gaysan.

### **Barnaamijka Booliska Mutadawaca ah**

Booliska Mutadawaca ah waa mutadawiciin dirays xidhan oo ka qayb gala hawlaha ilaalinta bulshadda, ee qaabka aan hubaysnayn oo ay kormeerayso RCMP. Waxay ka caawisaa ilaalinta bulshadda ku salaysan iyo ka hortagga dembiga, oo sidoo kale ay caawin karto saraakiisha kale hoosta duruufo kasta.

### **Barnaamijka Cadaalada ee Hagaajinta**

Barnaamijka Cadaalada ee Hagaajinta waa barnaamij mutadawac ku salaysan ee taageera dhalin yarada isagoo ku dhiirigelinaya iyaga inay fahmaan saamaynta dembiga ay galeen oo siiya fursada ay ku wanaajiyaan iyada. Mutadawaca ahaan, waxaad naga caawin lahayd abaabulka iyo fududaynta kullamada u dhexeeya dembiilayaasha iyo dhibanayaasha.

## **Barnaamijyada iyo Adeegyada**

### **Xad gudubka Guriga**

Rabshada gudaha guriga waxay noqon kartaa gudaha qaabka jidhka, xad gudubka dareenka ama galmada. Waxay ka dhici kartaa xidhiidh kasta oo waxya saamaysaaa dadka iyaddoon loo eegin jinsiga, da'da, ama asalka qoomiyada. Rabshada guriga maaha mid gaar ah ama arrin qoyska ah, waxay ku lid tahay sharciga. Haddii adiga ama qof aad garanayso uu yahay dhibanaha rabshada guriga waxaa la heli karaa caawimo. Waxaad la xidhiidhi kartaa adeega booliska maxaliga ah maadaama ay ku bixin karaan kaalmada luqaddo badan oo kala duwan.

### **Dembiga Nacaybka**

Gudaha Kanada, dembiga nacaybka ah sida dembi kasta oo ku lid ah qof ama hanti oo ay dhiirigeliso nacayb eex ku wajahan kooxa la aqoonsan karo. Kuwa soo socdaa waa kooxo la aqoonsan karo oo lagu faahfaahiyay Xeerka Dembiga ee Kanada: Isirka, Midabka, qoomiyada iyo luqadda, diinta, da'da, naafanimada maskaxda ama jidhka, sinjiga ama qaabka galmada, ama sabab kale oo la mid ah.

Dembiyada nacaybka ee looga warbixiyo booliska waxaa loo qaataa si dhab ah. Dadka lagu riday xukunka dembiga nacaybka ah waxaa la kulmayaan xukun aad uga adag dembiyada kale ee aanay dhiirigelin nacaybku.

Dowladda, booliska iyo ururada bulshadda waxay u midoobeen ku lid ahaanshaha dembiyada nacaybka ah. Ururadan waxay u jiraan si ay u ilaaliyaan oo u taageeraan shakhsiyaadka iyo bulshooyinka ay saamaysay weerarada ku salaysan aqoonsiga.

- Soo wac 9-1-1 si aad uga warbixiso dembiga nacaybka ah.
- Marka laga warbixinayo shilka, sheeg inaad ka warbixinayso Dembi Nacayb ah.
- Ka warbixi xaaladaha gurmada ah sida weerarka, weerarada iyo hanjabaadaha.
- Ka warbixin dembiyada xaaladaha gurmada aan ahay sida qoraalka gidaarada lagu qoro, burburinta hantida iyo dacaayada nacaybka ah. Shaqaalaha qabta wicitaanka ayaa kugu xidhi doonaa qaybta ku habboon si wax looga qabto xaalada.



## Caafimaadka Maskaxda iyo Jugta naxdinta leh

Imaanshaha wadan cusub ma fududa, gaar ahaan qofka ka imanaya aagaga khilaafyadu ka jiraan. Ka dib dhacdada naxdinta leh, ama taxane dhacdooyin ah, dadka qaar waxay la sii noolaadaan waayo aragnimada dhexda fikrado ku soo noqnoqda iyo caqabado kale. Waxay u saamayn kartaa noloshooda qaab wayn. Tan waxaa loogu yeedha dhibta jugta ka dib, oo waa qaab jirada maskaxda ah.

Jugta iyo walbahaarka jugta ka dib waa astaamaha guud iyo xaaladaha dadka laga barakaciyay guryahooda iyo wadamada iyaddoo ay sababtay khilaafyada.

Haddii aad u malaynayso adiga ama qof aad daryeeshaa inuu daneeyo wax ku saabsan dhibta walbahaarka jugta ka dib shayga ugu wanaagsan ee la samaynayo waa lala hadlo dhakhtarkaaga. Sidoo kale, hubi qaybta ilaha xaga dambe ee buuggan ee ilaha gaarka ah ee goobtaada juqraafiyeed.

## Dadka La waayay

Haddii xaaska, ilmaha, saaxiibka ama qaraabada ah la waayay waa inaad la xidhiidho booliska. **Maaha inaad sugto** muddo wakhti gaar ah si aad uga warbixiso qof la waayay. Boolisku waxay ka ururin doonaan adiga macluumaadka ku sabsan qofka la waayay iyo caadooyinkooda caadiga ah. Boolisku waxay waydiin doonaa sawir iyo macluumaad kale oo caawin kar ahelida qofka la waayay.

Haddii aad la imanayso dhacdo wayn carruurta, hore u sii samee qorshaha badbaadada oo ku saabsan waxa la samaynayo haddii aad kala maqnaantaan.

Tani waxay ka qayb ahaan kartaa habbaynta goobta kullanka guud ama u oggolaanshaha carruurta inay gartaa inay waydiisan karaan qof masuul ah sida sarkaal boolis ah kaalmo.

## Badbaawada Waayeelka

Macluumaadkan waxa uuku wajahan yahay dhanka bulshadda iyo, si gaar ah, waayeleka iyo daryeel bixiyayaashooda aqoonsasyada xad gudubka waayeelka, walaacyada badbaadada, khiyaamada iyo khiyaamaynta.

RCMP waxay ku ballanq aadaysaa yaraynta shilalkan ku lidka ah waayeelka iyaddoo lala kaashanayo muwaadiniinta, waxaanu samayn karnaa bulshooyinka ka badbaado badan.

Waxbarashadda iyo wacyi gelinta farsamooyinka ka hortaggu waxay caawin karaan aqoonsashada xaalada dembiga ee mustaqbalka oo waxya muujisaa sida loo yareeyo ama looga saaro khatarta.

Ka qayb qaado bulshaddaada oo garo in booliskaaga maxaliga ah uu kordhin karo dareenkaaga amniga. Ka qayb galkaaga sidoo kale waxa uu sare u qaadaa barnaamijyada iyo adeegyada loo heli karo bulshaddaada.



## **Ku xad gudubka qof Waayeel ah**

Ku xad gudubka qof Waayeel ah waxay tixraacdaa rabshadda, dhaqan xumada ama dayaca dadka waayeelka ee ku nool hoygooda gaarka ah ama goobahu ay kula kulmi kalaan gacmaha xaasaskooda, carruurta, iyo xubnaha kale ee qoyska, daryeelayaasha, adeeg bixiyayaasha adeega ama shakhsiyaadka kale gudaha xaaladaha awooda ama aaminaada.

Ku xad gudubka qof Waayeel ah waxay isku muujin kartaa tiro dhaqamo ah ee ay ogsoonaan karaan kuwan inta badan la macaamila waayeelka.

### **Qaababka Ku xad gudubka Qof Waayeel ah:**

- Dayaca (kuwa kale)
- Xad gudubka Jidhka
- Ku xad gudubka Galmada ah iyo Ka faa'iidaysiga Galmada ah
- Ku xad gudubka Nafsiyeed iyo Dareeneed
- Ku xad gudubka Dhaqaale (ka xadista ama si khaldan u isicmaalka lacagta waayeelka ama waxyaabaha ay haystaan)
- Ku xad gudubka Waaxeed (cidhiidhi, deegaanka xeerka xaadiga ah iyo/nolosha aan caafimaadka wanaagsan lahayn)
- Ku xad gudubka Xuquuqaha (xayiraya xoriyada iyo gaar ahaanshaha)
- Ku xad gudubka Ruuxiyeed (laga xayiray ama loo diiday ku dhaqanka diimeed ama ruuxiyeed, caadooyinka ama dhaqamada)

**Haddii adiga ama qof aad garnayso lagu xad  
gudubay, UGA WARBIXI BOOLISKA!**

## **Ka hortagga Dembiga**

Hadafka adeegyada ka hortagga dembiga ee RCMP iyo barnaamijku waa in lagu siisyo dadka reer Kanada macluumaadka qaabab waxtar leh si looga hortagga oo loo yareeyo dembiga iyaddoo la yaraynayo asbaabaha khatarta ka hor dembigu inta aanu dhicin.

Waxaanu si dhow ula shaqaynaa shuraadayadaya iyo daneeyayaasha gudaha gobolada iyo dhulalka si loo horumariyo oo loo hirgeliyo barnaamijyada yoolka saara arrimaha dembiyada qaar gudaha bulshooyinka dhammaan Kanada.

### **Badbaadada Gaarka ah**

Xusuusashada qayb tilmaamaha badbaadada aasaasiga waxay caawin kartaa ka hortagga dembigu inuu dhaco ama waxay kaa caawin kartaa ka jawaabida xaalada si waafaqsan. Tilmaan fudud laakiin waxtar leh waa inaad ogsoonaato hareerahaaga wakhtiga oo dhan. Rumayso dareenkaaga qarsoon iyo haddii shay aanu sax ahayn ka saar naftaada xaalada ama la xidhiidh booliska.

### **Budhcad nimo**

Haddii lagugu soo dhawaado, hadal ahaan lagu hanjabay ama jidha haan lagu weeraray waxaad iska ilaalin kartaa iska hor imaad dheeraad ah addo siinaya qofka wax kasta oo ay doonayaan – tan waxaa ku jiri kara telefoonkaaga gacanta, shandada lacagta, koofiyada, iwm. Ha murmin ama ha isku deyin inaad dib u dagaalanto maadaama tani ay xaalada sii xumayn karto.

Feejignaanta badbaadada dheeraadka ee aad qaadi kartaa waa:

- Ku soco kalsooni oo ogsoonow hareerahaaga.
- Iska ilaali qaadashada kiishadaha wayn ama boorsooyinka
- Hayso alaabta sida telefoonka gacanta iyo waxyaabaha qiimahabada ee kabaxsan aragtida.
- Keliya qaado aqoonsiga, lacag iyo/ama kaadhkaad u baahan doonto safarkaaga gaarka ah.

### **Dembiga Baabuurka**

Dembiyada baabuurka waxaa ku jira xadista baabuurka iyo tuugta baabuurkaaga. Xaalado badan waxaa lagaga hortagi karaa:

- Isticmaalka qalabka tuugada ku lidka ah.
- Baabuur dhigashada aagaga si wanaagsan nalku ugu shidan yahay ee dadka hareer socda.
- Ka saarida alaabta baabuurkaaga (waxa loola jeedaa kiishadaha wax iibsiga, isbeddelka, korontada, shandadaha, iwm.)
- Weligaa baabuurkaaga cidla hakaga tegin marka uu diirayo.
- Iyaddoo la qarinyo furaha albaabkaaga geerashka ama aad qaadanayso.

### **Amniga Guriga**

Ka hadalka qayb tallaabooyinka badbaadada aasaasiga xaga gurigu waxay yarayn kartaa fursadahaaga inay yoolka ku saaraan tuugtu. Tilmaamaha qaar waxaa ka mid ah:

- Hubi gurigaagu inuu si sax ah amni u yahay oo si wanaagsan nalku u shidan yahay.
- Quful albaabadaada iyo daaqadahaaga, xataa marka aad guriga joogto.
- Maal geli nidaamka digniinta.
- U oggolow jaar lagu kalsoon yahay ama saaxiib inuu

Waa muhiim in gurigaagu u muuqdo in lagu nool yahay marka tuugta yoolka ay saaraan guryaha. Tani waxay noqon kartaa wax fudud in la hubsado inaanay raso jariidad ah oolin dibada albaabkaaga. Sidoo kale, haddii aad qorshaynayso inaad ka baxdo guriga wakhti dheer, kala hubso shirkadaada caymiska maadaama ay u baahan karaa qof inuu eego gurigaago marka aad tabto si loo xaqiijiyo in weli lagu daboolo.

### **Badbaadada Jidka**

Darawalada, baaskiilad wadayaasha iyo dadka lugaynaya dhammaan waxaa saaran masuuliyada ay ku wadaagan jidka oo ku raacaan sharciga.

Dadka lugaynaya waa inay joogaan dhinacyada jidadka oo ka gudbaan goobta ka gudubka loo qoondeeyay. Lebisada dhar cad oo nalku ifinayo oo lagu arkayo gaar ahaan cimilada liidata ama habeenka. Haddii aad sonayso ama dhegaysanayso muusiga, ha gashan labbada sameecadood ee dhagaha dhegtaada ama aad ha u dalicin si loo feejignaado wax ku saabsan hareerahaaga.

Wadayaasha baabuurka waa inay raacaan sharciyada jidka Waa inaad sidoo kale hubiso haddii baaskiilku uu yahay nidaam si wanaagsan u shaqaynaya ka hor inta aanad raacin.

Darawalada waa inay ogsoonaadaan sharciyada jidka, sida lagu muujiyay Xeerka Baabuurta. Tan waxaa ku jira adeecida xadadka xawaaraha la soo geliyay, xaqiijinta baabuurkaagu inuu badbaado yahay si loo wado, iyo in dhammaan rakaabku ay badbaado ku fadhiyaan kursiga suunka leh. Wadista marka ay xumeeyaan maandooriyaha



ama khamriga waa sharci daro oo keeni karta xabsi, ganaax ama wakhti jeel ah.

Intaa waxa sheer, waxay ka soo horjeedaa sharciga darawaladu inay qabtaa ama diraan wicitaanada telefoonka, iyaddoo ay isticmaalayaan telefoonka aan gacanta lagu qaban. Darawaladu ma diri karaan ama heli karaan fariimaha qoraalka ah.

### Miyaad garnaysaa...

- Waa sharci inaad xidhato koofiyada marka aad raacayso baaskiilada.
- Ka gudub jidka ah waa marka aad ka gudubto jidka halka aanay jirin dadka ay ka gudbaan ee calaamada leh ama nalka jidka. Waa dembi oo waxay kordhisaa fursadaha in baabuurku aanu ku arki doonin taas oo keeni karta waxyeelo.
- Sharci ahaan, darawalka iyo dhammaan rakaabka ku jira baabuurku waxay u baahan yihiin inay xidhaan suunka kursiga.
- Ilmaha kayar 40 rodol oo ka yar 4'9" waxaa loo baahan yahay in ku jirto kursiga xoojinta ee sababaha badbaadada.
- Darawalada waa inay "Qaboojiyaan baabuurka oo ay Dhaqaaqaan" marka ay ku dhawaanayaan dhammaan baabuurta rasmiga ah ee joogsatay jidadka, iyadoo ridaya nalalka buluuga ah, casaan ama jaale.

### Khiyaamooyinka iyo Qaababka khiyaamada

Had iyo jeer ma fududa in la ogaado khiyaamada, iyo kuwa cusub ee la soo saaro maalin kasta.

Haddii aad ka shakido inaad yool khiyaamo u noqoto, ama haddii aad hadda ka hor dirtay lacag, ha yaxyaxin - keligaa ma tihid. Haddii aad doonayso inaad ka warbixiso khiyaamada, ama haddii aad u baahan tahay macluumaad badan, la xidhiidh Xarunta Ku lidka ah Khiyaamada ee Kanadiyaanka ah.

Telefoon ahaan: 1-888-495-8501

Websaydka: <http://www.antifraudcentre-centreantifraude.ca> (Ingiriisi iyo Faransiiska)

Adeegaaga booliska ee maxaliga ah waxay awoodaan inay taageero bixiyaan iyo macluumaad ku saabsan sida badbaado loogu ilaaliyo ay ku jiraan mowduucyo sida xadista aqoonsiga, khiyaamada badan ee quuqa (ay ku jiraan kuwa wax ku iibiya telefoonka iyo khiyaamada onlaynka ah), iyo khiyaamada lacag bixinta kaadhka. Macluumaadka dheeraadka ah la xidhiidh qaybtaada maxaliga ah.

### Ku ilaali Badbaado Carruurta

Waxaa jira dhow shay oo adiga, waalid ahaan, ay samayn karto inay kaa caawin doonto badbaado ku haynta ilmahaaga:



1. La xidhiidh – Waydii carruurta sida ay dareemayaan, maxaa ka jira gudaha dugsiga iyo cida ay saaxiibadood yihiin. Waa sax inaad waydiiso si aad la kulanto saaxiibka waalidka.
2. Ka qayb gal - Ogsoonow waxay qabanayaan oo tus inaad xiisaynayso hawlhooda ay ka qayb qaadanayaan.
3. Ka diiwaan geli ciyaaraha iyo/hawlaha kale ay xiisayn karaan.

*Waxaa jira hawlaha raaxada ee badan oo bilaasha ah oo kharash hoose ee xarumaha raaxaysiga maxaliga ah. Waxaad booqankartaa websaydka degmooyinka si loo barto wax badan oo ku saabsna fursadahan.*

## U xoog sheegashada

U xoog sheegashada marka qof ula kac u sameeyo ama uu yidhaahdo shay dhaawaxaya qof kale. Dhaqankan inta badan waa mid soo noqnoqda oo ula kac ah.

U xoog sheegashada waxay noqon kartaa: jidh ahaan (wax ku dhufashad, a dhufashada), hadalka (cay, ka cadhaysin), bulshadda (gooni yeelida, kutidhi kuteen) ama internatka (onlaynka, saxaafada bulshadda).

### Tilmaamaha Guud si Looga hortaggo U xoog sheegashada

- Wakhti la qaado carruurtaada si ay u caawiso kobcinta xidhiidh lagu kalsoon yahay. Haddii carruurtaadu ku aaminto oo ogtahay inay taageero haystaan, aad ayay ugu fududaan doontaa iyagu inay adiga kula hadlaan marka ay dhib qabaan.
- Noqo qof wanaagsan oo lagu daydo oo bar carruurtaada waxa ku saabsan tixgelinta kuwa kale iyaddoon loo eegin asalkooda hore, sinjiga ama kartida.
- Bar carruurtaada qaababka kala duwan ee u xoog sheegashada iyo cawaaqibka ka hor dhab ahaan inta aanay dhicin. Ku dhiirigeli iyaga inay sare u hadlaan hadduu ay arkaan qof loo xoog sheeganayo.
- La xidhiidh waalidka kale iyo shaqaalaha dugsiga si aad uga warqabto waxa ilmahaagu uu samaynayo.
- Ku dhiirigeli wiilkaaga ama gabadhaada inay ku biiraan kooxaha ama naadiyada xoojin kara kalsoonida iyo isku kalsoonaanta oo bixiya fursadaha si loo xoojiyo xidhiidhka iyo qaabka saaxiibtinimada.

## Badbaadada Internatka

Internatka waxaa isticmala dad aad u badan oo waxa uu qayb ka noqday noloshayada maalinlaha ah. Si fudud ayaa loo soo geli karaa dhexda kombuyuutarada gudaha guriga, dugsiga, maktabbada iyo telefoonada gacanta. Waalid ahaan, waxaad ka cyaari kartaan door hubinta isticmaalka carruurtaada qaab badbaado ah. Walaacyada qaar waxaa ku jiri kara: shay aan habboonayn, u xoog sheegasho, dhibaataaynta ama khiyaamayn/been ku khiyaamayn.

### TILMAAMAHA:

- Ka warhay carruurtaada marka ay isticmaalayaan internatka – dhig kombuyuutarka aagaga qoyska mashquulka ah sida kijada
- Ha bixin macluumaadkaaga gaarka sida macaga buuxa, taariikhda dhalashada, lambarka caymiska gaarka ah, iwm, Haddii aad buuxinayso foomka adeega gaarka ah, hubso in lagu sameeyo dhexda ku darida cinwaanka websaydka qaybta cinwaanka URL lagu qoro. Ha bixin macluumaadka gaarka ah dhexda linkiyada ama iimaylada.
- Ka feejignow waxa aad soo geliso onlaynka – haddii ay yihiin fariimo ama sawiro. Marka shay uu ku jiro internatka, way adag tahay in laga takhaluso oo way ku saamayn kartaa marka aad shaqo codsato.

## Kooxo fal dambiyeed

Kooxaha fal dambiyeed waa kooxo abaabulan oo gala dembi si ay u helaan lacag, awooda ama aqoonsi. Dhalin yaradu way ku biiri karaan iyaddoon loo eegin asalka isirkooda ama xaalada maaliyada.

Calaamadaha qof aad garanayso uu ka qayb qaadan karo waxaa ku jira:

- Soo jeedista wakhti dambe
- Dhaawacyada aan la sharaxin
- Wakhti yar la qaadashada qoyska iyo saaxiibada caadiga ah
- Aan la hadal saaxiibada cusub/ isbeddelka kediska ee saaxiibada
- Lacag ama shay ay caadi ahaan aanay haysan ama awoodaan

- Dookhyada midabka gaarka ah ee dharka (midabyada kooxaha dembiyeed)
- Qoraalada lagu qoro gidaarka ee sheeyada gaarka ah sida buuggaagta qoraalka ama gidaarada qolka fadhiga
- Taatuga ama ku samaynta calaamadaha kooxaha dambiilayaasha gacanta ama jidhka

### Maandooriyaha

Waalid ahaan, waa muhiim in wax la baro carruurtaada saamaynta waxyeelada leh ee maandooriyaha ay lahaan karto. Qaabka ugu wanaagsan ee tan lagu samaynayo waa in wax la baro naftaada marka koowaad. Waxbarashadda iyo wacyi gelintu waxay muhiim u tahay ka hortagga. Booliska maxaliga ah int abadan waxay iskaashi la sameeyaan dugsiyada si ay carruurta iyo dhalinyarada u siiyaan wacyigelinta maandooriyaha.

### Miyaad garnaysaa...

- Khamrada iyo buurga waa walxaha ugu badan ee ay isticmaalaan dhalin yarada.
- Dawo qiruda sida xanuun baabiiyayaasha sidoo kale waxa ala isticmaali karaa si loogu sakhraamo oo waxay leedahay saamayn khatar ah, gaar ahaan haddii daawada aan loo qorin qofka qaadanaya.
- Sheeyada guud ee qoyska sida xabagta, nadiifiyaha dheecaanka iyo buufimada waa la isticmaali karaa oo waxay leedahay saamayn caafimaad oo khatar ah.



## Ilaha Dheeraadka ah

**Joojiyayaasha Dembiga ..... 1-800-222-8477 (TIPS)**

Si loo bixiyo macluumaadka dembiga (magaca oo la qarinaldo)

**Ku celiyaha telefoonka ..... 1-888-495-8501**

Si looga warbixiyo khiyaamada telefoonka la xidhiidha

**Kelty Mental Health Isha Xarunta ..... 1-800-665-1822**

Carruurtaada, dhalin yarada iyo qoysaska dib u soo saarida la xidhiidha caafimaadka maskaxda iyo isticmaalka maandooriyaha

Wax ka qabadka dhibta, la talinta dhibta jugta u gaar ah qaxooriga ka yimid aagaga khilaafka ..... [www.dcrs.ca](http://www.dcrs.ca)

**Khamrada & Macluumaadka Maandooriyaha & Adeega Gudbinta ..... 1-800-663-1441**

Dadka u baahan caawimada dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha 24 saacadood maalintii.

**Laynka Caawimada Dhibaatada Khamaarka ..... 1-888-795-6111**

Macluumaadka 24 saacadood ah iyo adeega gudbinta kuwan si xun ay u saamaysay khamaarku.